



Republic of Somalia
Office of the President

XEER MADAXWEYNAHA J.S. Lr.280, taariikh 23/07/2012

Abuuris Gobol Cusub

MADAXWAYNAHA J.S.

- Markuu Arkay: Qodobka 39aad, faqradda 2aad ee Axdiga KMG.
Markuu Arkay: Xeer Madaxwayne Lr. 197 ee 23/05/2012 kuna saabsan Meel marinta Go'aanka ay Saxiixayaasha ku Gaareen Addis Abeba -Itiyobiya.
Markuu Arkay: Sharci Lr. 30 ee 30 Julaay 1984 ee lagu dhisay Wasaaradda Arr. Gudaha
Markuu Arkay: Qodobka 2aad Xubintiisa 5aad ee Sharci Lr.6 ee 12 Febraayo 1980 ee Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka
Markuu Garwaaqsaday: In ay laga maarmaantahay in Gobolka Hiiraan laga dhigo laba Gobol
Markuu Tixgeliyay: Soo jeedinta Wasiirka Arr. Gudanah & Amniga Qaranka Ref/WAG& AQ/467/12 ee July 22, 2012 ee ah Soo Jeedin Magacaabid Gobol

Wuxuu Xeeriyay:

Qodobka 1aad

Waxaa la dhisay Gobol Cusub oo lagu magacaabay loona aqoonsandoono Gobolka Shabeelaha Sare oo magaala madaxdiisu noqon doonto Buulo Burto kana kooban degmooyinka kala ah:-

- Buulo Burto
- Jalalaqsi
- Maxaas
- Shaw
- Buurweyn
- Ceel-Ciid (Qoryaale)
- Halgan
- Moqokori
- Buqda

Qodobka 2aad

Waxaa isna ladhisay Gobolkale oo lagu magacdaray Gobolka Hiiraan magaalo madaxdiisuna tahay Beledweyne kana kooban degmooyinka kala ah:-

- Beledweyne
- Far-Libaax
- Ceel-Cali
- Yucubka
- Booco
- Jawiil
- Abaaley
- Feerfeer
- Beergaadiid
- Hiiraan
- Matabaan
- Macaan-Qaalle
- Ceel Cadde

Qodobka 3aad

Soodimaha Degmooyinka labada Gobol dib ayaa loo habeen doonaa

Qodobka 4aad

Waxaa la baabi'iyay Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan lasoon Karin Xeerkaan

Qodobka 4aad

Xeerkaan wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO, 23/07/2012



Madaxweynaha J.S.
Shariif Sheikh Axmed